

Taageero badan oo loogu talagalay ardayda ay saameysay masiibada

Juun 01, 2022

Dowladda Alberta waxay maalgelinaysaa \$113 milyan doolar oo dheeri ah si ay u bixiso taageerooyinka lala beegsanayo ee ardayda ay la kulmaan caqabadaha waxbarashada iyo caafimaadka maskaxda.

Iyada oo qayb ka ah Qorshaha Waxqabadka Fayo-qabka Carruurta iyo Dhallinyarada Alberta ([Child and Youth Well-being Action Plan](#)) iyo iyada oo loo marayo Miisaaniyadda 2022, dawladda Alberta waxay u qoondaynaysaa \$110 milyan doolar oo dheeraad oo muddo saddex sano ah si ay wax uga qabato caafimaadka dhimirka, qiimayno khaas ah iyo taageerooyinka luminta waxbarashada. Dowladda Alberta waxay sidoo kale dib u soo celin doontaa barnaamij tijaabo ah si ay u siiso \$3 milyan doolar hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn si ay u hoggaamiyaan mashaariicda nafaqada ee dugsiya ee cusub sannad dugsiyeedka soo socda.

Caafimaadka maskaxda

Dawladda Alberta waxay u qoondaysay ilaa \$10 milyan doolar sannadka 2022-23 iyo 2023-24 si ay u taageerto mashaariicda tijaabada ah ee diiradda saaraya horumarinta bixinta taageerooyinka iyo adeegyada caafimaadka maskaxda ee ardayda, iyo agabka, tababarka iyo agabka bulshada dugsiya. Fahamka iyo horumarinta caafimaadka maskaxda ee togan ee dugsiyada waa masuuliyad la wadaago waalidiinta, barayaasha iyo la-hawlgalayaasha bulshada.

Qiimaynta gaarka ah

Dawladda Alberta waxay sidoo kale maalgelinaysaa ilaa \$10 milyan doolar sannadka 2022-23 iyo 2023-24 si ay u taageerto kororka gelitaanka qiimaynta gaarka ah. Tan waxa ku jira maalgelinta lagu hubinayo carruurta iyo ardayda, kuwaas oo laga yaabo in aanay helin qiimaynta khaaska ah inta lagu jiro aafada, in ay qiimayn karaan xirfadlayaal aqoon u leh oo ay ku jiraan dhakhaatiirta luqadda hadalka, daaweeyayaasha jidhka, daaweeyayaasha shaqada ama cilmu-nafsiga.

Taageeridda waxbarashada lunta

Qiimaynta ardayda sanadaha hore ee muhiimka ah ee waxbarashadooda ayaa fure u ah xaqiiqinta guusha waxbarashada wakhtiga fog iyo hubinta faragelinta hore ee la sameeyay si looga hortago caqabadaha waxbarashada mustaqbalka. Ilaa \$10 milyan doolar sanad dugsiyeedka 2022-23, sida hal mar kordhinta

maalgelinta 2021-22, waxay taageeri doontaa waxqabadyo dheeri ah oo ardayda fasalada 2-4 si ay u sii wadaan ku soo laabashada wadada.

Maamulka dugsiyada waa in ay ka qaybqaateen barnaamijka maalgelinta khasaaraha waxbarashada 2021-22 oo ay buuxiyeen warbixintooda dhamaadka sanadka ee Waxbarashada Alberta (Alberta Education) June 15 si ay ugu qalmaan kordhinta maalgelinta. Waxaa looga baahan doonaa inay maamulaan qiimaynta akhris-qoraalka iyo tirooyinka laga soo xulay liiska la ansixiyay. Liiskan la ansixiyay ayaa la helay bishii Abriil markii dawladdu ay ku dhawaaqday in maamulka dugsiyada looga baahan doono inay maamulaan qiimaynta akhris-qoraalka iyo xisaabta laga bilaabo Sebtembar 2022.

Nafaqaynta dugsiyada

Dowladda Alberta waxay sidoo kale dib u soo celin doontaa barnaamij tijaabo ah si ay u siiso \$3 milyan doolar hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn si ay u hoggaamiyaan mashaariicda nafaqada ee dugsiyada cusub inta lagu jiro sannad dugsiyada 2022-23. Iyada oo qayb ka ah Qorshaha soo-Kabashada Alberta ([Alberta's Recovery Plan](#)), ururada aan faa'iido doonka ahayn ee lagu soo xushay wicitaanka soo jeedinta waxay la kaashan doonaan dugsiyada si ay u tijaabiyaan habab cusub oo lagu taageerayo dhalinyarada nugul loona yareeyo kharashaadka shaqada iyo culayska maamulka ee dugsiyada iyadoo la hubinayo in ardaydu helaan cunto caafimaad leh, dheellitiran.

Waxbarashada Alberta waxay sidoo kale sahmin doontaa iskaashiga cilmi-baarista si loo baaro siyaabaha lagu hagaajinayo nafaqeynta dugsiyada ee Alberta.

Xaqiiqo degdeg ah

- In ka badan 40,000 oo arday ayaa hadda hela cunto nafaqo leh maalin kasta inkasto uu barnaamijku socdo. Cuntooyinka waxay raacaan Tilmaamaha Nafaqada ee Alberta ee Carruurta iyo Dhallinyarada ([Alberta Nutrition Guidelines for Children and Youth](#)).

Xog la xiriirta

- Caafimaadka maskaxda ee dugsiyada ([Mental health in schools](#))
- Barnaamijka nafaqeynta dugsiyada ([School nutrition program](#))
- Qorshe Hawleedka Fayo-qabka Carruurta iyo Dhallinyarada ([Child and Youth Well-being Action Plan](#))
- Qorshaha Soo kabashada Alberta ([Alberta's Recovery Plan](#))

Weydiimaha Warbaahinta

[Katherine Stavropoulos](#)

780-690-3317

Xoghayaha Warfaafinta, Waxbarashada

The logo for Alberta's Recovery Plan features the text "ALBERTA'S RECOVERY PLAN" in white, bold, uppercase letters. The text is contained within a white rectangular border that is partially open at the top and right sides. A yellow rectangular element is positioned at the top right corner of the white border.

ALBERTA'S RECOVERY PLAN

Alberta's Recovery Plan is a plan to breathe new life into Alberta's economy and create new opportunities for every Albertan. It's a plan to build, to diversify, and to create jobs.